


Ilmaha ku xaadiri imaanshihiisa iyo bixistiisa dhawr taabasho!



- ▶ Ikhtiyaaro badan ayay daryeel-bixiyayaashu leeyihiin aaladda la isticmaalayo - aalado kala duwan ayuu ku shaqeeyaa nidaamka elektorooniga ee xaadirisku.
- ▶ Sirta macluumaadka ilmaha waa la ilaalinayaa.

Joogto Ugu Xidhnaw

- ▶ Wax badan ka ogow nidaamka xaadiriska DCYF adiga oo booqanaya <http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/>
- ▶ Facebook ayaad naga heleysaa:
Washington-State-Department-of-Children-Youth-and-Families
- ▶ Waxaad ka eegtaa fulintu xarunta daryeelka ilmahaaga inay ka dhacdo guga 2018
- ▶ **Su'aalaha Guud ee Xaadiriska Elektorooniga ah**
 - ▶ Kala xidhiidh kooxda kaabista DCYF electronic. attendance@dcyf.wa.gov ama 360-725-4430
- ▶ **Taageerada Farsamo**
 - ▶ Lambarka xafiiska caawimada: 1-844-704-6777
 - ▶ Linkiga taageerada dheeraadka ah:
<http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training>



WASHINGTON STATE
Department of
Children, Youth, and Families

Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah



**Curinta Nidaamka Xaadiriska
Elektorooniga ah ee Daryeelka Ilmahaaga**
Waxaa laga dhigay mid fudud oo si sahlan loo isticmaali karo iyada oo sidoo kale lagu yaraynayo khaladaadka kharash dalicidda

Macluumaadka Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

La socodka xaadiriska kaqaybgalka carruurta ee barnaamijka taageerada daryeelka carruurta Washington waxaa iminka lagu sameeyaa foomam waraaqo ah. Kani waa nidaam murugsan oo ay qoysaska, daryeel-bixiyayaasha carruurta, iyo gobolkuba ku dawakhaan. Sidoo kale waxay keeni kartaa in lacag aanu lahayn daryeel-bixiyaha la siiyo.

- ▶ Daryeel-bixiyaha la taageero waxa uu isticmaalaya nidaamka xaadiriska elektorooniga ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) siisay, ama nidaam kale oo uu doorto daryeel-bixiyaha carruurta kaas oo buuxiyey shuruudaha DCYF.
- ▶ Daryeel-bixiyayaasha isticmaala nidaamka DCYF waxay isticmaalayaan kombuyuutarkooda ama taabletkooda si ay hawlaha uga maamulaan. Taabletyada daryeel-bixiyaha iyo taleefanada waalidiinta waxaa lagu isticmaali karaa goobta shaqada ee daryeel-bixiyaha si carruurta loo xadiriyo imaanshaha iyo bixistooda.
- ▶ Nidaamku waxa uu la socon doonaa, kaydin doonaa, oo uu ka warbixin doonaa xaadiriska ilmaha si loogu adeegsado qaansheegadka bixiyaha. Macluumaadku wuxuu raaca shuruudaha qarsoodiga.

Ahdaafta Nidaamka Xaadiriska

- ▶ Waxa uu baddali doonaa nidaamkii xaadiriska ahaa ee waraaqaha lagu qori jiray ee ay badi daryeel-bixiyayaashu isticmaali jireen.
- ▶ Waxaa lagu yaraynayaa wakhtiga daryeel-bixiyaha ilmuhu iyo adeegayasha gobolkuay ku bixin jireen sidii loo xisaabin lahaa saacadaha ilmuhu uu xaadiray.
- ▶ Waxaa loo hirgalinayaa nidaamka cusub qaab siyaabo kala duwan oo teknooloojiyad ah ugu taageeraya daryeel-bixiyaha ilmaha.



Hirgalinta Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ahi waxa uu leeyahay saddex waji:

- ▶ **Qorshaynta iyo Soo libinta (Buuxi)** Qorshayn Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah waxa uu bilaabmay Meey 2017. Waxaa kamid ah tan qiimaynta waxyaabo kala duwan ah oo lala samaynayo daryeel-bixiyaha ilmaha iyo waalidiinta si looga bogan karo ikhtiyaarada, iyo daraasad lagu sameeyo daryeel-bixiyayaasha nidaamadooda wakhtigan ay isticmaalaan iyo siday u heli karaan teknooloojiyadda. Wajigan waxaa kamid ah in la qiimeeyo sida ugu fudud ee nidaamyada loo adeegsan karo.
- ▶ **Curinta Nidaamka (Socdaa)** Wajiga Hore ee Hirgaliyayaasha waxa uu u sahlayaa daryeel-bixiyayaasha carruurta qaar inay tijaabiyaan nidaamka iyaga oo ku shaqaynaya oo ay fikir koodana kasoo dhiibanayaan. Fikirkan ay kasoo dhiibanayaan waxaa loo adeegsan doonaa in lagu horumariyo nidaamka kahor inta aan gobolka oo dhan la wada gaadhsiinin.
- ▶ **In La Tabobaro Daryeel-Bixiyayaasha Gobolka Oo Dhan**
 - ▶ DCYF waxay fahansan tahay nidaam iyo teknooloojiyad cusub in aan aayar uun la isku wareejin iyada oo aan dadka isticmaalaya lagu tabobarin.
 - ▶ Si wajiyo ah, DCYF waxay ku tabobari doontaa nidaamka cusub daryeel-bixiyayaasha. Ikhtiyaaro luuqado kale ah oo aan Ingiriisi ahayn ayaa jiri doona.
 - ▶ DCYF waxay kadibna u diyaarin doontaa nidaamka daryeel-bixiyayaasha lagu tabobaray.